STATE OF WASHINGTON

**DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES**

CHILD CARE SUBSIDY PROGRAMS (CCSP)

# Warqada Sugitaanka Daryeel bixiyaha Gudaha-Guriga ee Qaraabada / Qoyska, Saaxiibka iyo Deriska ah

**Family, Friend and Neighbor (FFN) In-Home / Relative Pending Letter**

Taariikhda: ________________

LAMBARKA TALEEFOONKA XARUNTA XIRIIRKA KAALMADA DHAQAALE EE DARYEELKA CARRUURTA

LAMBARKA FAKISKA XARUNTA XIRIIRKA KAALMADA DHAQAALE EE DARYEELKA CARRUURTA

LAMBARKA CODSIGA MACAMIILKA

Waxaad ka codsatay Daryeelka Ilmaha Xiriirrada Shaqada caawimaad si lagaaga bixiyo daryeelka ilmaha uu bixiyo midkood:

1. Qof aan-qaraabo ahayn (saaxiib ama deris) midkaas oo gurigaaga yimaada si uu ilmaha kuugu xanaaneeyo; ama
2. Qof qaraabo ah u qalma (qoys ah) oo jooga guriga qofka qaraabada ah ama qof u qalma oo qaraabo ah qofkaas oo yimaada gurigaaga si uu u qabto daryeelka ilmaha.

**Fadlan akhri kadibna raac tilmaamaha ku qoran Qaybta 1 iyo 2 ee warqadan.**

## Qaybta 1. Kahor inta aanan la oggolaanin lacag bixinta oo daryeel bixiyahana aysan ansaxin Waaxda Carruurta, Dhallinyaarda iyo Qoysaska (DCYF)

**Dhammaan** adeeg-bixiyeyaasha qoyska, saaxiibka, iyo deriska ah **waa in ay**:

1. Da'daadu tahay 18 sano ama ka weyn.
2. Diiwaangelin ka sameyaan barta adeeg-bixiyaha ee WA Compass dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/ffn. Tani waxaa ka mid ah soo-gelinta nuqulka saxda ah la akhrin karo ee kaarka Damaannada Bulshada saxda ah iyo aqoonsiga sawrika leh ee ay dowladdu bixisay, sida shatiga darawalka, aqoonsiga gobolka Washington, ama baasboor.

Marka diiwaangelinta dib loo eego, adeeg-bixiyaha waxaa loo diri doonnaa tilaamaha ku saabsan sida loo buuxiyo codsiga Baaritaanka Raadraaca ee Fudud (PBC) iyada oo loo marayo MERIT**.**

**Wixii ku saabsan su'aalaha, kala xiriir DCYF lambarkan 1-866-482-4325 Doorashada lambarka 8**.

| **Aan-Qaraabo ahayn**<br>Daryeelka ilmaha waxaa lagu oggolyahay kaliya guriga **Ilmaha** | **Qaraabo** (qoys xiriir dhiiga ah ka dhaxeeyo, guur ama shahaado maxkamad)<br>Daryeelka ilmaha waxaa lagu oggolyahay guriga **Daryeel bixiyaha** ama guriga **Ilmaha** |
|---|---|
| Daryeel bixiyuhu ma ahan qof xiriir la leh ilmaha wuxuuna yahay:<br>a) Saaxiib; ama<br>b) Deriska waalidka. | Daryeel bixiyuhu wuxuu xiriir la leeyahay ilmaha wuxuuna yahay:<br>a) Walaal weyn oo ku nool guri ka baxsan midka ilmaha;<br>b) Ayeeyo ama awoowe (sidoo kale ayeeyayaal iyo awoowayayaal-waaweyn);<br>c) Habaryar/eedo ama adeer/abti (sidoo kale ayeeyayaal iyo awoowayayaal);<br>d) Ina-adeer/ina-eeddo ina-abti/ina-habaryar (waa in ay buuxiyaan shuruudaha Caafimaadka iyo Bedqabka ee Qaybta 3aad) ama<br>e) Qofkale oo xiriir dhiig qoys, guur ama shahaado maxkamad ah. |
| | Haddii uu daryeelku yahay mid ka dhacaya **guriga daryeel bixiyaha**, daryeel bixiyaha waa in uu ku khasbaa dhammaan dadka da'doodu ay tahay 16 sanno ama ka weyn, kuwaas oo la nool qofka qaraabada ah in ay sidoo kale buuxiyaan codsiga Baaritaanka Raadraaca ee Fudud. |

**Qaybta 2. Kadib oggolaanshaha DCYF.**

Taariikhda bilowga lacag-bixinta waa maalinta baaritaanka Raadraaca ee Fudud ee la oggolaadey loo helay adeeg-bixiyaha ama taariikhda baaritaanka Raadraaca ee Fudud ee la oggolaadey ee ugu dambeeyay ee xubnaha qoyska ee loo baahan yahay.

Si ay xaq ugu yeeshaan lacag-bixinta, dhammaan bixiyeyaasha FFN waa in ay:

A. Ku buuxiyaan, sagaashanka (90) maalmood ee ugu horreeya taariikhda lacag-bixintu ay bilaabato, tababarka Dabagalka Imaanshaha Eliktarooniga ah ee DCYF. Ka raadi macluumaadka tababarka halkan dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training ama nidaamkaaga dabagalka imaanshaha elektarooniga ah haku ansaxiso DCYF halkan dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training.

B. Isticmaalaan maalin walba nidaamka imaanshaha eliktarooniga ah si ay u geliyaan wakhtiga ay bilaabaan iyo wakhtiga ay dhammeeyaan daryeelka la siiyo ilmo kasta kadibna ay u soo gudbiyaan diiwaannada eliktarooniga ah DCYF bil kasta ayaga oo isticmaalaya nidaamka eliktarooniga ah.

C. Ka dhigaan macluumaadkooda ku jira barta adeeg-bixiyaha WA Compass iyo MERIT kuwo lagu cusboonaysiiyo wax kasta oo isbedel ah oo ku dhaca magacooda sharciyeed, cinwaankooda, emailkooda iyo lambarkooda teleefoonka.

D. Ka dhigaan Baaritaankooda Raadraaca ee Fudud mid la cusbooneysiiyay (waxaa loo baahan yahay 3 sanno kasta).

**Qaybta 3. Shuruudaha dheeraadka ah**

Kuwaan soo socda waa **shuruudaha u qalmitaanka-socda ee dheeraadka ah** ee loogu talogalay daryeel bixiyaasha taas oo lagu saleeyay xiriirkaa ay la leeyihiin ilmaha iyo halka uu daryeelku ka dhacayo:

| Bixiyeyaahsa **Aan Qaraabada ahayn iyo Ina-adeer/Ina-abti**<br>Daryeelka Qofka Aan-Qaraabada ahayn ayaa la oggol yahay **Keliya in lagu sameeyo guriga carruurta.** | Daryeel bixiyaasha **Qaraabadaha** ah ee U qalma<br>Daryeelka carruurta waxaa la oggol yahay in uu ka dhaco guriga **Carruurta** ama **Daryeel-bixiyaha** |
|---|---|
| 1. 90 maalmood ee ugu horreeyo gudahooda ka-dib taariikhda ay lacag-bixintu bilaabaneyso, adeeg-bixiyuhu waa in sameeyaa:<br>a) Tababarka Bedqabka iyo Caafimaadka ee DCYF ama haystaa xaqiijinta ka reebitaanka tababarka ee DCYF sida ku cad WAC 110-16-0025(2)(b). Tababarka Bedqabka iyo Caafimaadka ee DCYF waxaa laga heli karaa bartan internet-ka: https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/ffn;<br>b) Samee tababarka dib-u-noolaynta wadnaha (CPR) iyo gar-gaarka koowaad ee qofka weyn, carruurta, iyo dhallaanka.<br>c) Gei taariikhda uu dhammaadey tababarka Gargaarka Degdegga ah/CPR gudaha MERIT https://apps.dcyf.wa.gov/MERIT/Home Bixi caddeynta tababarka Gargaarka Degdegga ah/CPR (kaar, shahaado, ama waraaqda macallinka).<br>d) Samee tababarka hurdada ammaanka ah ee carruurta yaryar marka aad daryeeleyso carruur yaryar<br>2. Ka-qaybgal booqashada sannadlaha ah ee lala sameynayo Takhasuslaha Laga Dhaafey Shatiga ee DCYF, ee guriga halka daryeelka lagu bixiyo. Marka aad joogtaan, adiga, waalidka waxaa la idinku dhiirrigelinayaa in aad xaadir noqotaan goobta. Ujeeddada laga leeyahay booqashadu waxay tahay in la hubsado in adiga iyo daryeel bixiyaha aad u hoggaansan tihiin shuruudaha ammaanka iyo caafimaadka, ilaalisaa deegaanka daryeelka carruurta iyo la-tacaamulka daryeel bixiyaha uu la leeyahay carruurta, iyo in aad ka wada-hadashaan hab-dhaqannada caafimaadka iyo bedqabka.<br>3. Samee ugu yaraan laba saacadood oo ah tababarka Ammaanka iyo Caafimaadka ee ay ansaxisey DCYF sannad kasta. | 1. Marka uu ka dhacayo daryeelka ilmaha gudaha guriga daryeel bixiyaha qaraabada ah, dadka da'doodu tahay 16 sanno ama ka weyn kuwaas:<br>a) Oo la nool daryeel bixiyaha qaraabada ah waxaa khasab ku ah in ay ka dhigaan Baaritaankooda Asalka La qaadi karo mid la cusboonaysiiyo (loo baahanyahay 3 sanno kasta).<br>b) Oo u qorshaysanaya in ay la noolaadaan daryeel bixiyaha qaraabada ah, waxaa khasab ku ah in ay ka dhigaan Baaritaankooda Asalka La qaadi karo mid la sameeyo kahor inta aysan ugu soo wareegin guriga daryeel bixiyaha. |

Oggaanshaha Daryeelka Ilmaha (Child Care Aware) waxay bilaash ku siisaa, macluumaad iyo wareejin aan eex-lahayn qoysaska raadinaya daryeel ilmo rukhsadaysan oo leh tayo-saraysa. Ka wac 1-800-446-1114 ama booqo barta internet-ka childcareaware.org.

Si aad u hesho qaanuunnada baaritaanka raadraaca ee daryeelka carruurta shatiyeysan, taariikhda shati-siinta, warbixinnada korjoogteynta, luuqadaha lagu hadlo iyo wax kale oo badan, booqo: Baaritaanka Daryeelka Carruurta findchildcarewa.org. Haddii aadan awoodin in aad macluumaadkan ka hesho barta internet-ka, fadlan xafiiskeenna kala xiriir 1-844-626-8687 si aan macluumaadka kuu sinno.

Waxaad oggaan kartaa haddii ilmahaaga ama koritaanka ilmaha uu yahay mid wanaagsan ama haddii ay ayadu u baahantahay tababar yar oo dheeraad ah si ay diyaar ugu noqoto iskuulka. Si aad sidaan u samayso, waxaad buuxin kartaa su'aalaha qoraalka ah ee baaritaanka koritaanka ilmaha bilaashka ah adiga oo ka wacaya Khadka Marwalba Shaqeeya ee Caafimaadka Qoyska lambarkan 1-800-322-2588 ama booqo bogga internetka Caawimaada Waalidka 123 http://www.parenthelp123.org/child-development/help-me-grow-washington si aad u oggaatid wax badan oo arintaasi ku saabsan.

Carruurtu waxay leeyihiin xuquuqda aadanaha ee aasaasiga ah si ay u bedqabaan. Hanjabaad xad gudub iyo dayicaad ah ee loo gaysto ammaanka ilmaha midaas oo gelinaysa khatar dhaawacyo jireed iyo dareen ah iyo xitaa dhimmasho. Haddii aad ka shakiso in ilmuhu uu yahay dhibane xadgudub ama dayicaad, kasoo wac DCYF lambarkan teleefoonka bilaashka ah 1-866-END-HARM (1-866-363-4276).

**Fadlan ka wac Xarunta Xiriirka Kaalmada Daryeelka Carruurta haddii adiga, waalidka, uu qabo wax su'aalo ah oo ku saabsan tallaabooyinka xiga ama xaq u yeelashadaada joogtada ah 1-844-626-8687.**
**Haddii uu daryeel bixiyahaagu qabo su'aalooyin ku saabsan hawsha oggolaanshaha iyo shuruudaha u sheeg in ay la xariiraan takhasaslahooda ka reeban rukhsada halkan: 1-866-482-4325 #8 ama email u dir dcyf.ffn@dcyf.wa.gov.**